



Ref: SSIC/094/018

Date: 16/10/2018.

War-Saxaafadeed

Ka dib, kulan ay yeesheen Golaha Aqoonyahanada Koonfurta Soomaaliya ee dalka iyo dibadda waxay walaac iyo wal-wal ka muujinaayaan habsami u socodka u diyaar garowga doorashada lagu wado inay dhacdo 17.11.2018 sida uu horeyba u shaaciyey guddonka Baarlamanka Koonfur Galbeed oo fadhigiisu yahay Caasimadda kumeeel gaarka ah ee magaalada Baydhabo.

Hadaba, Golahaan wuxuu aragtadiisa ku muujinayaa in ay doorashadaan hakad gelin karto ama qal-qal siyaasadeed dhalin karto qodobadaan aan hoos ku xusi doono haddii ay yimaadaan.

1. Dastuurka Koonfur Galbeed oo aan ku jirin qodobo xusaayo in la sameeyo guddi doorasho iyo habraaciisa oo wada jira.
2. Ayadoo ay jiraan qodobo aan dastuurka ku qorneyn laakiin ku qoran xeer-hoosaadka golaha Baarlamaanka KG sida; qodobka 42 ee xeer-hoosaadka Baarlamaanka KG kaasoo sheegaayo in guddi qaban qaabo waqti gaaban shaqeeyo loo sameyn karo doorashada Madaxweynaha.
3. Ka dib, markii Guddonka Baarlamaanka uu soo magacaabo guddiga doorashada Madaxweynimada Ayaan la hubin in uu ansaxin doono Golaha Baarlamaanka Koonfur Galbeed iyo in kale.
4. Magacaabista guddigaasi haddii ay ka soo dhex muuqdaan xubno dhan u janjeera oo horey u muujiyey rabitaankooda shaqsiyadeed abuuri karto qal-qal siyaasadeed.

5. Haddii guddiga doorashada uu keeno sharuudo siyaasadeysan oo aan dastuurka iyo xeer-hoosaadka Golaha Baarlamaanka Koonfur galbeed iyo kan Dowladda Federaalka Soomaaliyeed midna aan waafaqsaneyn wuxuu dhalin karaa Amni darro iyo siyaasad aan deganayn.
6. Haddii Musharaxiinta qaarkood ay ku kalsoonaan waayaan xaruunta Baarlamaanka oo Madaxtooyada ku dhex taalo tartankana uu ku jiro Musharaxa Madaxweynaha hadda talada haaya waxay keeni kartaa kalsooni xumo doorasho xaq iyo xalaal inaysan dhaceynin.

BAAQ.

Hadaba, waxaan ugu baaqaynaa hay'adaha howlaha doorashada ee Madaxweynaha Koonfur Galbeed ku shaqo leh in ay ka digtoonaadaan qodobadaan wel-welka dhalinaayo kuna dadaalaan ama saxaan intey goori goor tahay si ay u dhacdo doorasho Xur iyo Xalaal ah oo ku dayasho fiican u noqoto doorashooyinka fooda nagu soo hayso ee maamul-goboleedyada Soomaaliya oo dhan.

Wa-

Bilaahi Towfiiq.

